

Joojinta iska saarida guriga ee COVID-19 Ilaalinta Ijaartaha oo 5-tallaabo ah

TALLAABADA 2: Ogow Xuquuqahaaga

Sharci dejinta Oregon ayaa ansixisay sharci si mulkiilayaasha guryaha ee Oregon aysan waxyaabaha soo socda u sameyn karin ilaa laga gaarayo **Oktoobar 1**:

1. in ay bixiyaan ogeysiinta iska joojinta ijaarka ee la xiriirta bixin la'aanta lacagta ijaarka ama lacagaha waqtigeedii la bixin lahaa ku aadan yahay inta u dhaxaysa Abriil 1 ilaa Sibtambar 30;
2. in ay bixiyaan ogeysiinta iska joojinta ijaarka sabab la'aan;
3. in ay ijaarka aan la bixin ama lacagaha u sheegaan hay'adaha dhanka credit-ka 'credit agencies'; ama
4. in ay dadka ka qaadaan lacagaha ijaarka ee lala soo daaho

Ka dib marka joojinta 'moratorium' iska saarida gurigu dhammaato Oktoobar 1, ijaartayaashu waxay haystaan ilaa Maarso 31, 2021 si ay u soo gaaraan wixii bixinta lacagta ijaarka ah ee ay seegeen intii dhaxaysay Abriil iyo Oktoobar 2020. Laakiin mulkiilayaasha guryuhu waxay bixin karaan ogeysiinta iska joojinta ijaarka ama waxay gudbin karaan iska saarida gurigu oo loogu talagalay sababo kale, inta lagu jiro ama ka dib iska joojinta 'moratorium' labadoodaba. Macluumaad dheeraad ah ayaad ka heli kartaa OregonLawHelp.org.

TALLAABADA 2: Warqad U qor Mulkiilahaaga

Haddii aad u maleynayso in ay kugu adag tahay bixinta ijaarkta, mulkiilaha gurigaagu ugu sheeg qoraal ahaan oo keydso koobiga. Barnaamijyo badan ayaa caawiya ijaartayaasha ka hor inta aysan dib uga dhicin ijaarka ama ka caawiya ijaartayaasha inay la qabsadaan kirada. Isla markiiba caawimaad codso.

TALLAABADA 3: WAC 2-1-1 AMA Booqo 211.info.org

La xiriir [Community Action Agency \(CAA\)](http://CommunityActionAgency(CAA)) ee kuu dhow. Waxaa dhici karta in aad u qalanto caawimaada dhanka ijaarka, tamarta iyo wayaabo dheeraad ah. CAA waxay bixisaa macluumaad lacag la'aan ah. Sababo la xiriira tiro badan oo codsiyo ah oo jira, waxaa dhici karta in ay jirto muddo la sugayo si loogu qalmo iyo/ama loo helo caawimaad.

TALLAABADA 4: Ururinta Macluumaadka

Marka lagu daro kaalmada gobolka iyo federaalka, qaar ka mid barnaamijyada degaanka, hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn, ama ururada diimeed ayay dhici kartaa in ay caawimaad geystaan. Sidoo kale, waxaa laga yaabaa in aad awoodo dejinta qorshe qayb ahaan lacagta lagu bixinayo oo aad la leedahay mulkiilahaaga. Kala doorashadani waa mid ikhriyaari ah laakiin waxay caawimaad ka geysan kartaa yareynta kirada gadaal lagaaga leeyahay marka la gaaro dhammaadka wakhtiga dheeraadka ah ee la isa siiyay 'grace period' (Maarso 2021). Macluumaadku waa kuwo si dhakhso ah isku beddelaya, markaa sii wad raadinta wararka ka socda [xafiiska Guddoomiyaha Gobolka](#), [hay'adaha gobolka](#), iyo ururada lagu kalsoon yahay.

TALLAABADA 5: Is Diyaari

Haddii aadan ijaarka bixin Oktoobar, mulkiilaha gurigaagu wuxuu ku siin karaa ogeysiinta iska joojinta ijaarka ee la xiriirta bixin la'aanta lacagta ijaarka ee Oktoobar, ka dibna wuu gudbin karaa iska saarida guriga haddii aadan bixin ijaarkaaga. Waxaa sidoo kale dhici karta in aad ogeysiin ka hesho mulkiilaha gurigaagu kaasi oo kaaga baahan in aad isaga ugu sheegto muddo 14 maalmood ah gudahood haddii aad qorsheynayso in aad wakhtiga dheeraadka ah ee la isa siiyay 'grace period' ee lixda bilood ah u

Joojinta iska saarida guriga ee COVID-19 Ilaalinta Ijaartaha oo 5-tallaabo ah

isticmaasho in aad dib ugu bixiso wixii lacag ijaar ah ee jirta wakhtiga dheeraadka ah ee la isa siiyay 'grace period' **Waa in aad u soo jawaabtaa oo mulkiilaha gurigaaga u sheegtaa haddii aad qorsheynayso in aad isticmaasho wakhtiga dheeraadka ah ee la isa siiyay 'grace period'.** (Waxaa wanaagsan in lagu soo jawaabo qoraal ahaan, oo koobi la haysto.) [Xarunta Sharciga Oregon](#) iyo [Isbahaysiga Bulshada ee Ijaartayaasha](#) ayaa haya warqado tusaale ah oo aad isticmaali karto si aad mulkiilaha gurigaaga ula socodsiiiso in aad qorsheynayso in aad isticmaasho wakhtiga dheeraadka ah ee la isa siiyay 'grace period' **Haddii aadan u sheegin mulkiilaha gurigaaga, wuxuu kugu soo dalici/qaadi karaa lacagta ganaaxa ijaarka oo ah bil barkeed, ka dib Maarso 31, 2020.**

Xusuusno, waa in aad soo gaartaa 'catch up' wixii ijaar ah ee aadan bixin intii dhaxaysay Abriil iyo Oktoobar 2020 marka la gaaro Maarso 31, 2021. Macluumaadkani wuxuu noqon karaa mid adag. Fadlan booqo website-ka [Xarunta Sharciga Oregon](#) iyo [Isbahaysiga Bulshada ee Ijaartayaasha](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo qoto dheer.

Naftaada Daryeel

Wakhtiyadan adiga ee lagu jiro iyo walaaca sii socda waxay saameyn ku yeelan karaan hurdada, caafimaadka dhimirka iyo xiriirada la leeyahay. [211](#) ayaa bixisa ilo iyada oo [Isbahaysiga Qaranka ee Xanuunka Dhimirka ee Oregon](#) uu leeyahay khadka caafimaadka dhimirka oo lacag la'aan ah oo loo loogu talagalay taageerada.